MAQAALKA SADDEX BILOODKA AH EE JOOJINTA GUDNIINKA HABLAHA

NAFIS NETWORK MEMBER ORGANIZATIONS UNITE TO END FGM/C: QUARTERLY STATEMENT RELEASED IN SUPPORT OF NATIONAL AND REGIONAL CAMPAIGNS

NAFIS NETWORK 2023 VOL 1

Gudniinka Habluhu waa xad-gudub ka dhan ah xuquuqda caafimaad iyo mida jidheed ee Inanta

Hordhac

Gudniinka Hablaha, oo inta badan loo yaqaan gudniinka dumarka, waa dhaqan soo jireen ah kaas oo dhaawac u geysta xubinta taranka ee hablaha, meeshana ka saara qayb ama dhammaan xubinta taranka ee inanta. Somaliland waxa ay ka mid tahay dalalka ugu badan ee laga sameeyo Gudniinka Hablaha, iyada oo 98% lagu sameeyey Hablaha. Guddo dhaqameedyo ayaa ku shaqaysta shaqadan, waxa ayna ku sameeyaan hablaha iyaga oo aan adeegsanayn wax caawimo ah sida suuxiso ay xubinta ay qalayso xanuunka ka disho iyada oo isticmaalaysa makiinad ama minddi. Badanaa hablaha waxa lagu sameeyaa gudniinka marka ay da'doodu u dhaxayso 4 -12 jir. In kasta oo mar-marka qaar lagu sameeyo hablaha marka ay dhashaan ama ay aad u yaryar yihiin; taasina ay saameyn ku yeelan karto.

Gudniinka Hablahu waa mid khatar badan, kaas oo keena xanuun aad u daran, dhiig bax, caabuq iyo in marmarka qaar inanta yar ay ku dhacdo miyir-doorsoon. Gudniinka Habluhu wuxuu keenaa xannuunno joogta ah, sida murugo iyo xaalad nafsiyan ah, wuxuna sababa dhiig bax aad u badan siiba wakhtiga dhalmada ka dib, waxaanu ku keena haweenka in foosha ay ku dheeraato.

In kasta oo uu yahay xanuun haddana Gudniinka Habluhu waxa uu qayb ka yahay dhaqanka Soomaalida, kaas oo ujeeddada loo saameyaa ay tahay inuu u diyaariyo hablaha guur iyo dhawrsanaan. Wacyi-gelinta ururada bulshada rayidka ah, dhisidda awoodaha iyo aqoonta bulshada, culimo-aw-diinka iyo is-xog-waydaarsiga, ayaa noqday mid ka caawiyay bulshadu intooda badan inay bartaan ama aqoonsadaaan saamaynta taban ee Gudniinka Habluhu uu ku leeyahay cafimaadkooda iyo isku dayga lagu dabar jaraayo dhaqankan mudada badan soo jiray. Tobannaankii sanno ee ugu dembeeyay waxaa kor u kacaya wacyiga iyo waxbarashadda bulshadu u yeelanayso Gudniinka Hablaha.

Saamaynta uu leeyahay Gudniinka Habluhu.

Gudniinka Habluhu wuxu khatar ku yahay caafimaadka haweenka Soomaaliyeed, waxaanu ku keenaa dhiigbax, caabuq, iyo inay inantu miyir-doorsoonto ama argagax ku dhaco, badanaa waxa la isticmaala makiinado, ama middiyo kala duwan marka la samaynaayo Gudniinka iyada oo aan la suuxinin inanta yar. Tani waxay kor u qaadi kartaa khatarta keeni karta in ay yimaadaan dhibaatooyin kala duwan.

Gudniinka Habluhu wuxuu sababi karaa dhimasho, wuxuuna keenaa saamayn taban oo caafimaad darro ah, xanuun badan taas oo noqota mid muddo dheer socon karta. haweenka lagu saameyey Gudniinka Hablaha waxaa laga yaabaa inay la kulmaan xanuun joogto ah,

caabuqyo soo noqnoqda, iyo murugo nafsi ah. Waxa kale oo ay yeelan karaan dhibaatooyin ka soo gaadha dhalmada sida foosha oo dheerta, dhiig bax yimaada dhalmada ka dib, taas oo sababi karta in qaar kood u dhintaan dhiig-baxaas; gaar ahaan dumarka ku nool meelaha miyiga ah.

Gudniinka Habluhu, waxa kale oo uu saameeyaa caafimaadka habdhiska taranka ee haweenka, dareenka jinsiga ee dumarnimo, sidoo kale wuxu sababi karaa in uu hoos u dhaco dareenka haweenka; taas oo saamayn taban ku yeelan karta xidhiidhka lamaanaha. Qoysas badan ayaa u sameeya in gudniinka habluhu yahay mid loo bahan yahay si inanta loogu diyaariyo guur iyo inay noqoto mid dhawrsoon. Dhaqankani waa mid ka baxsan hab-dhaqanka wanaagsen ee bulshadda, waayo waxa uu dhaawac u geysanayaa hablaha; Haweenku waa inay awood u yeeshan sidii u go'aamin lahayeen caafimaadka iyo fayo-qabka jidhka habalahahooda maadaama oo jar-jaridda xubinta taranka ee inantu aanu ahayn waajib diinteena Islaamku ina farayso oo ah mid aynu Illaahay ugu dhawaanayno ama ajar kaga heleyno.

Doorka Ururada Bulshada Rayidka ah ee la Dagaalanka Gudniinka Hablaha

La dagaalka iyo joojinta Gudniinka Hablaha waxaa door muhiim ah ka qaata Ururada Bulshada Rayidka ah, Waxay safka hore kaga jiraan wacyigelinta iyo ciribtirka Gudniinka Hablaha. Madaama Gudniinka habluhu uu wax u dhimayo caafimaadka gabdhaha iyo haweenka Somaliland. Ururada Bulshada Rayidka ah ee ka hawl-gala heer qaran, gobol, iyo degmo ba; waxay kor u qaadaan wacyiga bulshada, iyaga oo caawinaya dumarka la dhibaataysan Gudniinka Hablaha. Sida oo kale, waxa ay bulshada bareen aqoon ku saabsan khataraha ka dhalan kara Gudiniinka Hablaha iyo siyaabaha loo yareyn karo si goordhawna loo cidhibtiro Idamka Illaahay.

Ururada Bulshada Rayidka ahi waxay kala shaqeeyaan dawladda sidii loo cidhibtiri lahaa Gudniinka Hablaha . Waxay kor u qaadaan oo ay ka shaqeeyaan meelmarinta iyo hirgelinta sharciyadda.

Ururada Bulashada Rayidka ahi, waxay kala taliyaan dawladda meelaha u baahan in laga hagaajiyo. Ururada Bulshada Rayidka ah ee heer gobol, waxay baraan bulshada khataraha uu leeyahay Gudniinka Habluhu, waxayna u doodaan sidii loo sameyn lahaa is-bedello kala duwan. Waxay ku dhiirigeliyaan hogaamiyayaasha bulshada, odayaal dhaqameedka, iyo culimada inay u doodaan sidii loo joojin lahaa gudniinka hablaha, loona beddeli lahaa hab-dhaqankan taban ee bulshadda.

Ururada Bulshada Rayidka ah waxay caawiyaan qoysaska iyo haweenka uu saameeyay Gudniinka Habluhu, waxay ka caawiyaan dumarka uu saameeyey gudniinka habluhu, waxay u ololeeyaan sidii loo joojin lahaa Gudniinka Hablaha, waxay waxbaraan, tababaraan, oo taageeraan qaxootiga, dadka soo laabtay, iyo dadka nugul. Waxay la dagaalamaan Gudniinka Hablaha, waxay kor u qaadaan caafimaadka haweenka, taageeraan dumarka uu ku dhacay gudniinku, waxayna siiyaan adeegyo daryeel. Shaqadoodu waxay muhiim u tahay ka shaqaynta cidhibtirka Gudniinka Hablaha iyo

dhiirigelinta gabdhaha iyo haweenka ee ah inay sameeyaan doorashooyinka go'aamada la xidhiidha caafimaadkooda.

Baaq ka yimid ururada bulshadda rayidka ah si loo joojiyo Gudniinka Hablaha

Ururada Bulshada Rayidka ah ee Somaliland ayaa hormuud ka ah dagaalka lagu doonayo in lagu cidhib tiro Gudniinka Hablaha, kaas oo ah caado soo jireen ah oo dhibaato u geysata hablaha iyo haweenka Soomaalida. Si loo ilaaliyo sharafta jidheed ee haweenka loona joojiyo ku-dhaqanka caado dhaqmeedkan, Ururada Bulshada Rayidka ahi waxay ku boorinayaan dawladda Somaliland inay ansixiyaan oo ay fuliso siyaasadda ka-hortagga Gudniinka Hablaha.

Haddaba, Ururada Bulshada rayidka ah waxa ay ku boorinayaan dawladda Somaliland sidii ay u mamnuuci lahayd Gudniinka Hablaha iyada oo la fulinayo siyaasadda joojinta Gudniinka Hablaha ee qabyo qoraalka ah. Istaraatiijiyadani waxay caddayn doontaa in Gudniinka Habluhu uu yahay sharci-darro aanay u bannaanayn waalidka in ay gudaan hablohooda. Waxay sidoo kale ka hortagi doontaa Gudniinka Hablaha iyada oo caawin doonta dumarka uu ku dhacay gudniinku. Dowladda, bulshadda rayidka ah, culimo-aw-diinka iyo oday dhaqameedyadu waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan joojinta Gudniinka Hablaha. Joojinta Gudniinka Habluhu wuxuu u baahan yahay ballan-qaad dawladdeed, dawladduna waa inay aqbashaa oo ay maalgelisaa kana shaqeeysa sidii siyaasadda ka-hortagga Gudniinka Hablaha loo ansixin lahaa.

Ururadda bulshadu waxay aqoonsan yihiin in joojinta Gudniinka Habluhu ah ay u baahan tahay habab dhinacyo badan leh oo ay ku lug leeyihiin dowladda, bulshada rayidka ah, culimo-aw-diinka, iyo oday dhaqameedka. Si kastaba ha ahaatee, dawladda ayaa door muhiim ah ku leh joojinta Gudniinka Hablaha.

Waxa aan ugu baaqaynaa dowladdu inay muujiso sida ay uga go'an tahay joojinta Gudniinka Hablaha , iyadoo la ansixinayo siyaasadda iyo sharci lagu xakameeyo sii socoshada caadadan wax yeellada leh

DHAMAAD.